# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 11aad

**Sabti 30 April 2019**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Qabyo qoraalka Xeerka Xawaaladaha

**Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Aw-xoog)** **"15min 57sec"** Shir-gudoonka, Mudanayasha, Saxaafada iyo Marti-sharafta intaba waan salaamayaa, Saalaan ka dib, halkan waxaan ku haynaa ajandaha kal-fadhiga 39aad sidii loo soo kala horeysiiyay, si fiican bay u socotaa, maalintii ugu horeysay Gudidda Joogtada Warbixinteedii baynu dhagaysanay, maalintii xigtay qiimeynta xaalada siyaasadeed ee geeska afrika ayaynu ka dooddnay, iminkana waa mashaariicdii oo ay ugu horeyso Xawaaladu, maalintii laga dooddayay Ajandaha anigu waxaan ka mid ahaa xildhibaanadii soo jeediyay in horta la keeno xeerkii Guud ee Bangiga marka meesha waxaa ka dhacay is-faham waa, in la shaqeyo maan diidanayne waxaan lahaa horta ha la keeno Xeerkii Banking Act, xeerkaasi bay waxan oo dhami hoos imanayaan oo fududeeya (facilitate) xawaaladaha iyo lacag maydhistaba, markii dooddii la isku soo guray Xeerkii Xawaalada kan kowaad baad lag soo dhigay, marka xeerkan waynu guda galaynaa, xeerkaasina waxaa la ii sheegay in Xukuumada lagu celiyay oo Wasaarada Diinta la soo marinayo, marka intaa sugi mayne waynu shaqaynaynaa.

Xeerkan Wax ka badalka Gudiddu ka soo shaqaysaya, dedaal badan bay galiyeen oo inay aad uga soo shaqeeyeen baa ka muuqata, marka anigu wax ka badalkoodii baan falanqaynayaa iyo kaabistoodii.

**Qodobka 4aad Farqada 2aad** bay ka bilaabeen waxay ahayd markii hore waxay ku diri karaan ama ku bixin karaan lacagta ay dirayso Somaliland Shilling, waxayna Gudidda soo jeedinaysa **"Waxay ku qaban kartaa ama ku bixin karta lacagaha ay dirayso shillingka Somaliland iyadoo la raacayo siyaasada isku badalka lacagaha qalaad ee Bangiga dhexe"** Marka halka ay siyaasada ka dhigeen anigu waxaan odhan lahaa ***"jaangoynta maalinlaha ah (Daily exchange)".***

**Farqada 4aad** ee isla qodobkaas waa arrimaha ka reeban inay gudahooda ganacsi ku dhex fuliyaan adeeg ka baxsan kan bangigu u ogolaaday, waxay Gudiddu soo jeedisay sidan "waxaa laamahaas ka reeban inay gudahooda ku dhex sameeyaan adeeg ganacsi oo aan

ahayn kan ruqsada loo siiyay" may sheegin cid ruqsada siisay, marka anigu halka waxaan ka dhigi lahaa **"adeeg ka baxsan ka bangigu u ogolaaday".**

**Qodobka 5aad Farqadisa 2aad** Gudiddu waxay ka saartay xarafka (a) oo ahaa xawaalad shakhsiyad qaanuuni ah leh waxayna ka dhigeen xarfihii b iyo t oo Af-ingiirisigii bay ka badaleen markaa anigu waan ku raacsanahay inay ka saaraan xarafkaas (a) gudiddu siday soo jeedisay waayo xawaaladu ma laha shakhsiyad qaanuuni oo hadii uu bangigu ruqsad siinayo isaguun (bangiga) ayaa leh shakhsiyad qaanuuniya oo hay'ad madax banaan ah, marka inay A ka saaraan waan ku raacay.

**Qodobka 6aad** ee Shuruudaha ruqsada waxay Gudiddu badaleen halkii ahayd foomka codsiga oo ay ku badaleen **"warqada codsiga",** halkii ahayd khidmada laga qaadayo ee ajuurada waxay ku soo qoreen "feegii laga qaadayay ama ajuuradii codsiga furida xawaalad wadani ah, waxa lagu keenay xeerka in laga qaadayo 8,000,000 Sl.SH. markaa waxay u kala saareen xawalaada qof reer Somaliland ahi furanayo iyo xawaalada Ajanabi ah. Guddidu way ka fudaydiyeen oo waxay yidhaahdeen ninka Somalilander ha laga qaado 5,000,000 SL.SH marka loo ogolaanayo, ajanibkana waxay yidhaahdeen 15,000,000 ha laga qaado oo qoladii keentay xeerka waxay yidhaahdeen 8,000,000 SL.SH ha laga qaado, waxaanan raacsanahay taas Bank keenay.

Ninka xawaalada firaya waa nin lacag haysta waanu bixin karaa 8,000,000 SL.SH waana in aan laga dhigin 5,000,000 SL.SH. Waxay u cuskadeen garan maayo 15,000,000 SL.SH, laakiinnwaxaan leeyahay waxay ahayd in libin laab ama saddex laab laga dhigo oo dhigayo oo ajaanibka laga qaado 24,000,000 SL.SH muwaadinkana laga qaado 8,000,000 SL.SH.

Qodobka 6aad isla Xarafka E, F iyo G ee Guddidu ku saxday khalad madbiciya, markaana laga dhigo farqada 8, 9 , 10 iyo 11 waa sax oo haddii aad ku aragto khalad mabdiciya waa sax. Markaa Guddidu xawaaladaha waddniga ah 1,000,000 ayey ka dhigeen, xawalaadaha ajaanibka ahna 5,000,000 SL.SH. Anigu waxaan ka dhigi lahaa oo aan u daayey 8,000,000 Sl.Sh iyo 24,000,000 SL.SH.

Farqada 9aad ee isla qodobka oo dhigan sidan: Qorshe Ganacsi (Busniss Plan) Xawaalada oo si faah faahsan u muujinaya nooc ganacsi nooca maamul iyo qaab dhismeed ee xawaalada iyo Qorshe maaliyadeed saddexda sanno ee u horeeya. Waxaan baaq ama wareegto ku soo saari doonaa.

Waxay guddidu soo jeedisay in laga dhigo qorshe ganacsiyeedka xawaaladaha oo si faahfaahsan u muujinaya nooca Ganacsiga, Qaab dhismeed iyo qaabka maamulka iyo odoros maaliyadeed saddexda sanno ee u horeeya.

Shirkad kasta oo ruqsad loo siiyey inay bixiso adeeg xawaaladeed markaa waxa loo yimid qodobka 8aad. Qodobka 8aad waxa uu ka hadlayaa damaanada ruqasada.

Qodobkani waa qodob loo baahna sababtoo ah xawaladuhu waa Business, Busineess-kaasi dad ayuu lacag ka ururinayaa malaayin lacag ah ayaa tilifoonkan yar ugu jira, lacag kalena waxay ku xaraysan tahay xawaalada oo xawaaladii Bank wax la dhigtay noqota.

Haddii ay barrito kacdo dadkii reer Somaliland garan maayaan meel ay lacagtoodii u raacaan, markaa in lacag damaanad ah la dhigaa waa biyo kama dhibcaan.

Anigu markaa waxaan odhan lahaa waan ku raacsanahay in damaanada loo kala saaro Ajaanib iyo Waddani labadaba, iyada oo la raacayo qodobka 6aad habkii iyo hanaankii aynu soo jeedinay, markaa iyagu waxay ka dhigeen " Xawaalada Waddaniga ah 1,000,000,000 SL.SH ah oo deposit ah oo u dhiganta $ 100,000, xawaalada shisheeyana Iyana 3,0000,000,000 SLSH. Markaa anigu aniga oo qodobkaygii hore ka duulaya halka bilyan waan ku raacsanahay in laga dhigo damaanada xawaalada waddaniga ah, laakiin waxaan odhan lahaa nin ajaanib ah oo waddanka ka shaqaysanaya waxaan raacayaa taydii hore waxaan odhan lahaa saddex jibaa ha laga dhigo. Markaa waa sax oo waxay raaceen qodobkii aan markii hore raacay ee saddex jibaarka.

Qodobka 9aad: Cusboonaysiinta Ruqsadaha. Waxay cusboonaysiintii ku soojeedisay qoladdii xeerkan keentay. Marka hore waxay yidhaahdeen qofka ruqsad soo doonta waxa laga qaadayaa ayey yidhaahdeen 7,000,000 SLSH suurto galmaaha ma xawaalada cusub ayuu furanayaa, qolada Guddiduna way gogaadeen oo waxay yidhaahdeen "Xawaalada waddaniga ah 2,000,000 SLSH ha laga qaado, Xawaalada ajaanibka ahna ha laga qaado 7,000,000 SL.Sh. anigu waxaan ka dhigi lahaa in laga dhigo kala badh ajuuradii laga qaadi lahaa furashada xawaaladaha. Markaa mar haddii laga dhigay ajuuradii 8,000,000 SL.Sh ha laga dhigo 4,000,000 SL.Sh.

Markaa waxaan soo jeedinayaa in xawalada waddaniga ah cusboonaysiinta laga qaado 4,000,000 SL.SH, ajaanibka waa in laga qaadaa saddex jibaar 12,000,000 SL.Sh.

Qodobka 10aad: Ha kinta iyo kala noqoshada Ruqsadaha. Farqasada koowaad ee waxa lagu hakinayaa muddo aan ka badnay 90 maalmood.

## Kal-fadhigii 39aad Fadhigii 12aad

**Axad 31 April 2019**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Qabyo qoraalka Xeerka Xawaaladaha Maalintii 2aad

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil (Gaane)** **(6Min 32Sec):-** Asc Xeerkan sidiisaba waa xeer muhiim ah, waana xeer u baahan in la keeno marka uu dhamaado xeerkii ka ganacsiga Bangiyadu iyo weliba xeerkii Bangiga dhexe isaga laftigiisa kaabis iyo waxka bedel lagu sameeyo oo iminka aad moodo inuu jilicsanaa, qaabka ay wadaan hadana iyada oo ay saas tahay wixii aanu u aragno inay muhiim tahay ee lagu darayo xeerka.

**Qodobka 8aad** anigu waxaan **soo jeedin** lahaa halka ay yiraahdeen waxa laga qaadayaa xawaaladaha oo ajuuro looga qaadayaa ama lacag ay rabto %5 Capital ayaa looga qaadayaa halka ay yiraahdeen dhigaal baa laga qaadayaa qodobka 8aad waxay yiraahdeen ha laga qaado xawaalada marka la siinayo feega, marka waxaan leeyahay dhigaalka ama waxa la yiraahdo depositka, way yartahay oo waxa la yidhi ha laga qaado feega xawaaladaha ay bixinayso, waxaan odhan lahaa Somaliland shilling ta somaliga ah ee localka ah ama muwaadiniintu leedahay 8,000,000 Milyan, tankalena waxaa la yiri 15,000,000 Milyan.

Waxaan odhan lahaa lacagtaasi 8,000,000 Milyan barri bay noqonaysaa waxba yahay, waxaan soo jeedin lahaa lahaa $10,000 oo Dollar lacag Somaliland shilling u dhigma marka si marwalba $10,000 uu u noqdo si marwalba veluegu mid taagan.

Hadii 8,000,000 Milyan lagu daayo dee 8Milyan barri waxay noqonaysaa waxba yahay markaa waa in aynu nidhaahnaa mid mar kasta qiimaheedu taagan, xawaaladaha shisheeye waxaan odhan lahaa $30,000 oo Dollar lacag Somaliland shilling u dhiganta halkaa u dhiganta lagu daro lacag doolar ah oo qiimaheedu taagan yahay iyadoo shilling somaligiina laga tagayn, lacagtaa qiimaheda bixinta xawaaladaha halkan waxaan ka arki waayay bixinta xawaalada marka ay shaqaynayso xawaaladu.

Xawaaladu ma waxay ku shaqaynaysaa Local Currencyga Somaliland shilling mise dollar bay toos u bixinaysaa, sidoo kale, halkan kama muuqato macaashkeeda xawaaladu waxay bixinayso waxaan anigu aaminsanahay waa qodob muhiim ah

xawaalada iyo bixinteeda waxaan odhan lahaa in xawaalada iya 50% inay ku bixiso Local Currency 5%0 ka hadhay 30dona ay qaadato xawaaladu Dollarka 30 uu sarifkeeda uu qaato dollarka 20 uu qaado dollarkeeda si loo xoojiyo bangiga dhexe oo doolarkaa dibada ka imanayaa uu bangiga dhexe wax ugu yeesho %20 gaa sarifkaas uu bangiga dhexe wax ku yeesho 30 ay qaadato xawaaladu 50 qofkii loosoo diray dollarka uu qaato inta kalena inta kalena lagu siiyo local currency

**Qodobka 15aad** waxaan ku dari lahaa halkaa ay leeyihiin shaqaalaha ay yeelanayso xawaalad kastaa in ay ugu jirto nin ka socdaa bangiga dhexe si uu u hubiyo xawaalada iyo transactionkeeda waayo waxaa xukuumada kaga luma cashuuro badan markaa waa in lagu biiriyaa qodobka 15aad oo toddoba lagaga dhigaa inuu ka shaqeeyo nin ka socdaa bangiga dhexe xawaalada lagu biiriyo oo bangiga ku biiriya si loola socdo transactionka ay samaynayso dhaqdhaqaaqa xawaaladu ay samaynayso loona ilaaliyo cashuurta kaga lumaysa xukuumada ina haas ayaan anigu ku soo kordhin lahaa, xawaaladaa sida uu sheegayo waa inay ku cadahay xawaaladaha laga hadlayo.

E-Electronic lacagta ay dhigayaan markastana ee Depositeka ah 5% waa inaanay ka yaraan.

Halka ah, marka bangiga la aassaasayo 2 Bilyan oo Somaliland shilling ah halkaas waxaan odhan lahaa lacag u dhiganta $200,000 oo dollar oo somaliland shilling oo iyana ugu jirta ha laga dhimo halkaa qodobka aasaasida ka hadlayana ee la leeyahay marka la soo cadaynayo bangi ganacsina oo la aqoonsan yahay waa inuu soo cadeeyaa inay ku jirto lacag dhan 2bilyan halkaa labadaa bilyana waa in laga dhigaa lacag aanka yarayn 200,000 oo dollar wasalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf “10min 46sec”** Bismilaahi, ASC, Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti sharaftaba waan idin salaamay, xeerka baanka ka yimi ee ay guddiduna si wanaagsan u soo eegtay waaxeer wanaagsan labada nuqulna waan isla akhriayay, xeerka ay qolada baanku keentay waxaad moodaa in uu aad ugu dhawyahay xeerarka uu bangiga dhexe uu ku ilaalinayo baananka tijaariga ah, kol hadii aynaan lahayn baanan tijaariya oo maanta shaqaynaya ama ay yar yihiinba ama aanay gudanayn waajibaadkii looga baahnaa, xawaaladihii oo fara-batayna in sidii baananka loo maamulaa waa bulshada danteeda, bangina in uu aad u ilaaliyo danta qaranka weeye.

Markaa waxan oo dhan lahaa bangiga dhexe wuxuu u baahan yahay inuu isagu mar uun doollarkii gacanta ku qaban karayo si uu sixir-bararka u maamulo taas oo dhici wayday, markaa anigu aad iyo aad ayaan u raacsanahay in uu sidan u soo qoro aniga oo aan waxba ka badelin meelo yar-yar mooyaane sidaa uu baanku u soo qoray ayaan ku raacsanahay, waxayna ahayd in xeerkani aynu samayno markii ay Xawaaladuhuba ay yimaadeen oo lagu maamulo.

Xawaaladihii maanta waxaa lagu yidhi Lacag dhigasho ma qaban kartaan oo baanka ayuun baan lacag dhigasho qaban karaya amaahna ma bixin kartaan, markaa waa xawaalada (Transfer) ama dibada ha u direen ama dalka ha u direene. Lacaga xawaaladaha dibad u taala ama major currencies hadii noqon lahayd doollar, Gini in uu lacagtaa dibada ku qabtaa waa waajib waana uu ku dhawaanayaa si uu maamul u yeesho, markaa in xawaaladaha aad iyo aad loo control-lo aad iyo aad ayaan u taageersanahay.

Xeerkana sidiisa ayaan ku raacsanahay waayo danta bulshadaa ku jirta in xawaaladaha iyo hay'aadaha maaliyadaha la ilaaliyo waxaanay ahayd in mar horaba la siidaayo, xisaab ha furina markii la yidhi waa sax, waxba ku sii adkayn maynee sidaa uu baanku u soo qoray hadii ay ruqsadaha iyo cusboonaysiintooda tahay waxaas oo dhan sidooda ayaan ku raacsanahay.

Shan qodob oo yar-yar ayaan wax ka baddeli lahaa marka aan hoos u eegay waxaana ka mid ahaa Ujuuro iyo Fadhiisin waxaa la isticmaali jiray markii aynu mal-caamadaha dhigan jirnay waana hadalo meesha ka baxay, baryahan danbe waxaa caadi ah oo la isticmaalaa khidmad waxaanan soo *jeedinayaa in lagu baddelo Khidmada* taas intaa ayaan ka odhan lahaa.

Halka ay guddidu ku soo qortay warqad codsi ah Bagiguna uu ka dhigay form ka ama application-ka uu buuxsanayo marka xawaalada la furanayo *halkaana waxaan ka dhigi lahaa arji* iyada ayaa caan ah oo hada la isticmaalaaye.

**Qodobka 10aad F/2aad** wax- beddelka ay guddidu ku samaysay waxay ka tagtay Sentence ah *ama shuruudaha kale ee baanka* waxaan soo jeedinayaa in aan kalmadaa laga tegin ee ha loo qoro sidii uu baanku u soo qoray, waayo waxaa weeye meel walba waa in uu maamulaa bangigu oo uu dhimo ama saraysiiyo.

**Qodobka 14aad** waa marka ay shirkadu *kacdo*, anigu waxaan halkaa odhan lahaa *xidhitaanka shaqada Xawaalada,* ha laga dhigo ayaan soo jeedinaya, meesha kale ee ay ku qorantahay *musalaf* waxaan soo jeedinayaa in la dhigo *Kacdo.*

Guddidu halka hanti-dhowrka waxay ku soo saartay ama ay ku qortay *certified auditor* halka uu bangigu ka soo qoray *auditing financial Statement* markaa ninkan Audit-gareeyay ayaan Certified ah-ba markaa taa looma baahna ee ha laga saaro ayaan soo jeedimayaa.

**Qodobka 20aad** waxaan soo jeedinayaa in loo daayo sidii uu bangigu u soo qoray, waayo isaga ayaa ka masuul ah habaynta iyo jihaynta iyo ilaalinta shaqo ee hay'addaha maaliyadeed oo ay xawaaladuhuna ka midka yihiin.

**Qodobka 21aad** kormeerka waxaan soo jeedinayaa in loo daayo sidii uu bangigu u soo qoray, una kormeero, qodobka 17aad ee ay guddidu sheegtay wax kale ayuu ka

hadalayaa oo waa kaydinta Record-ka 5-ta sanadood ee ay ku qoreena way wanaag santahay sidaa ayaana caalami ah intaas ayaan ku soo gabogabaynayaa, WSC.

**Md. Faarax Maxamuud Cabdille "10min 08sec"** waxaan salaamayaa Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba, Mudanayaal Xeerkani waa Xeer aad u muhiin ah, anigu xogaa ayaan soo akhriyey waxyaabo badanina waa ka dhiman yihiin, hadaba Qodobadan macnahooda la qeexay, sida (xawaalada shisheeye waxaa loola jeedaa ganacsi xawaaladeed oo ay leeyihiin dad aan ahayn muwaadiniin reer Somaliland ah), anigu waxaan ku sii darey: ***hashiisna uu la galey baanka dhexe ee Somaliland.***

Waxaa kale oo aan ka saaray **Qodobka 3[aad]/ faqradiisa B**, oo odhanaysa ***(Dayminta lacagaha)*** Anigu waan ka saarey oo waa xawaalad. Waxaa kale oo aan ka saaray **Qodobka 5[aad] /faqrada A** oo odhaneysa, ***(xawaalad leh shaqsiyad qaynuun)*** halkaana waan ka saarey oo waa xawaalad.

**Qodobka 8[aad]** ee Damaanada rusqadaha, waxaad mooda in gudidu ka tagtey arrin aad loogu baahanyahay oo gudidu soo hadal qaadin lacagaha la isugu gudbiyo mobile oo imika noqotey xawaalada ugu weyn, sidaas darteed waxaan ku soo darey farqad sideedaad oo ah (lacagta ***xawaaladaha ee la isugu gudbiyo mobile waxaa baanka dhexe ka qaadayaa inta shirkadu ka qaado macmiilka iyagoo ku wada xidhiidhaya qalab ay ku wada socdaan)***

**Qodobka I0[aad]** ee hakinta iyo la noqoshada ruqsadda, anigu waxaan ku darey farqad E oo noqonaysa sidan ***(ay jabiso heshiis baanka dhexe ee Somaliland wada galaan)***. **Qodobka I2[aad]** ee mudada rusqada, waxaan ku darayaa farqad 4aad oo ah ***(xawaalad kastoo ku guul dareysata waa in codsiga ku cadeysaa sababta ay ku guul dareysatey ee codsiga loogaga noqdey)*** waa marka codsi dambe soo qoraneyso

**Qodobka I5[aad]** maamulka xawaaladaha **f/6aad** ee u qoran **(xawaalad kasta waa in ay yeelato sargaal u qaabilsan ka hortaga maydhista lacagaha)** anigu waxaan u dhigay farqadaas sidan ***(Xawaalad kasta waa in ay ku shaqeysoxeerka xawaaladaha iyo waajibaadka aya ku heshiiyaan baanka dhexe)***

**Qodobka I6[aad]** ee Hanta-dhawraha Xawaaladaha waxaan **F/I[aad]** ee ah (Xawaalad kasta waa in ay sanad kasta magacawdo hanti-dhawre madax-banaan oo uu Ansixiyo Baanka dhexe) ***anigu waxaan odhan lahaa, hadii loo baahdo***

**Qodobka 24[aad]** ee Hirgelinta Xeerkan **F/I[aad]** waxaan ka saari lahaa (***6 Bilood)***. **Qodobka 28[aad]** dhaqan alka xeerka, (Anigu waxaan ka saarayaa ***faafinta rasmiga ah*** waayo marka Golayaashu Ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo wuu Ansaxay xeerkaasi waana dhaqangal.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud "6min 34sec"** Waan idin salaamayaa Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada, Xeerkani waa Xeer muhiim ah baahi badana

loo qabo, hadii aynu eegno erey bixinta baanka Ganacsiga waxaa loola jeedaa hay'ad Maaliyadeed ha ahaato mid wadaniya ama Shisheeya ah,

Runtii Baanankaas shisheeye baahi wayn ayaan u qabna,a Golahana waa tii hore loo keeney Xeerarkii Baananka Ganacsiga ee buuqa badan ka dhashey, Damaanad waxa loola jeedaa qadar lacageed oo cayiman, dahab ama hanti ma guurto ah oo u dhiganta qadar lacag ah ee xeerku sheegey oo baanku kuu haynayo xawaalada mudada ay ruqsadu shaqeyneyso. **Hakin,** waxaa loola jeedaadaa in si ku meel gaadha loo joojiyo muddo cayiman ku shaqeysiga ruqsad uu baanku bixinayo, hadaba waxaan odhan lahaa qofka muwaadinka ah waa in la cadeeyo wax looga joojinayo, waxa in sharaxaad badan la saaraa hakintaas

**Qodobka 4aad** waan soo dhoweynayaa in Bangiga Somaliland mudnaanta la siiyo iyo lacagta Somaliland Wadankeena waxaa yimaada qaad lacag badani inagaga lunto sanad walba iyo maalin walba, wax inaga soo galana ma jiro, wadanka Ethiopia lacagtaas badana waxa ay ku qaataan lacag doller ah, taasian ma fiicna, waayo waxaa qiimo dhacaaya shillinka Somaliland, anigu waxaan soo jeedin lahaa lacagtaa waa in ay ku qaataan bir oo doller ha laga joojiyo.

**Qodobka 2aad /farqada 1aad** ee Aassaasida Xawaalada, waxaan ku dareya baanka Somaliland. **Farqada (A)** waa in la cadeeyo xawaalad leh shaqsiyad qaynuun, waxaan kale oo taageerayaa xildhibaanadii soo jeediyey in bangigu sameeyo sharciyo badan oo xakameeya lacagtan electronic ah oo imika isku bedeshay xawaalado cusub oo casriya.

**Md. Maxamed X. Yuusuf Axmed (Waabeeye):- "(2Min 21Sec)"** Waad Mahadsantihiin horta Xawaaladahan la leeyahay waxaa laga qaadayaa Feega, deexawaaladuhu isku mid maahoo waa ay kala awood weyn yihiin.

Markaa anigu waxaan odhan lahaa halkaas karateeriya haloo sameeyo siday u kala sareeyaan waxaa jira xawaalad laba qof ka shaqeeyaan baanka markaa xawaalado waa waynoo caanoo lacago badan Capital kordhiyaana way jiraan, iyo kuwo cusub oo dhaqaalahoodu uu yar yahay. **Waxaan Soo Jeedinayaa** halkaas soo jeedin lahaa in uu Bangigu sameeyo (criteria) oo uu kala qaado lacagaha oo u kala qaado banku oo xeerku u samaysmo.

Waxaa jirta **Qodobka 14aad** waxaad yara moodaa maamulka xeerka xawaaladaha in xooga saareen in sidii institution Dawladeed oo kale ama Commision waa inay Agaasime yeelataa Hanti-dhawre yeelataa, Matalan **Qodobka 15aad F/1aad** Xawaalad kasta waxaa waajib ku ah inay yeelato ugu yaraan hal Agaasime Fulineed markaa Structure xawaaladaha qaab xisaaboodkooda iyo waxoogoo dhan baa laga rabaa iyo Auditing-kooda, laakiin in Structure in loo sameeyo markaa ilama haboona waxaa kaloo jiray.

**Qodobkaas 15[aad] F/4[aad]** magacyada iyo raadraaca CVyada iyo Saraakiisha sar-sare waxaa loo soo gudbinayaa Baanka xawaalad kastaa waa inay yeelataa sarkaal u qaabilsan ka hortaga maydhista lacagaha qodobkaas oo kale in lagu daraa waa muhiin oo Money Laundry ayaa inagu soo badanaya, laakiin waxaan u bedeli lahaa Structure koodii ha loo daayo qaab xisaabeedkii bangigu soo gudbiyay qodobo kale buu ku xusan yahaye ay soo gudbiyaan any Report intaasaan kusoo koobayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Xassan Xuseen Shide** (**3Min 07Sec)** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Martida dhamaan waan salamaayaa Asc, salaan kadib, xeerkan markii aan soo yara indha indheeyay wixii aan anigu isdultaagay xildhibaanadii iga horeeyay ayaa badan kiisii ka hadlay.

**Qodobka 8[aad]** oo ah damaanada xawaaladaha laga dhigay waxaana ku qoran lacagtaa damaanada kuwa wadaniga ah 1,000,000 hal milyan Sl/shl, kuwa kalena waxaa ku qoran 3.000,000 milyan Sl/shl, halkaa milyan ee laga qaaday islaan walba oo caanalay ah oo laba baloodh lihi inta ay balood iibiso saw xawaalada ma furan karto.

Xaawaaladuhu waxay masuul ka yihiin lacagaha adag ee dibadaha laga soo dirayo, marka inta aynu illaalinayno nin ama dhawr muwaadin oo ganacsade ah waxaa uu xil inaga saaranyahay bulsho waynta, sidii jiif iyo jaqda hadii dadka inta lacagta uun laga ururiyo dabadeedna xawaaladu iska kacdo oo kii $100,000 helaaba uu iska furto mushkilad bay noqonaysaa, halkaa anigu waxaan odhan lahaa aad kor ha loogu qaado oo ha laga dhigo lacag ilaa $300,000 oo dollar ama saddex Milyan ah, halka ta shisheeyana laga dhigayo dhabal taasoo ah 6Milyan ama transaction ka ay xawaaladu maamusho oo %6 bankigugu damaanad u hayo ama tan zaadka ama tukale ha noqotee waxay dadka masuul uga yihiin illaalinta xuquuqdooda iyo lacagtooda markaa hadii loo sadburiyo qof xawaaladle ah oo siduu doono ula macaamilo oo ay kacdo sida marar hore inagu dhacday oo aanay dadkii lacagtoodii aanay helin.

Marlabaad, waa inay diwaangaliyaan hantida ay leeyihiin si looga helo lacagahoodii oo aanay faataxo ku dhamaan, anigu qodobkaas ayaan adkaynayaa waxyaabaha kale ee xeerku uu ka hadlayo wuu fiican yahay.

**Qodobka 15[aad]** Inuu qof shaqaale ah oo bangiga kasocdaa uu had iyo goor uu la joogo ama kormeer ahaado oo transactionka ay maamulaan si looga qaado lacagta ku waajibtay waxaan aad u adkaynayaa tan damaanada si ay dadku lacagahoodii ugu yaraan kala badh ay helaan intaasaan ku soo gabagabaynayaa.

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa** **"10min 46sec"** Bismilaahi, shir-gudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamaya, qodobo yar-yar ayaan iska dul taagay wax ka beddelkan lagu sameeya xeerkan Xawaaladaha, waxaa kale oo aan la akhriyay xeerkii hore ee uu baanku soo sameeyay, xeerkani waa xeerarka muhiimka ah ee

bulshada taabanaya dhaqaalahooda iyo noloshoodaba, waxaa kale oo uu doorweyn ku leeyahay siyaasadda iyo jaangaynta maaliyadaha.

**Qodobka 4aad** adeegyada Maaliyadeed marka uu ka hadlaayo waxaa uu sheegayaa in uu isticmaali karo Somaliland shiling iyo lacagaha kale labadaba iyada oo aan lacagaha kale aan la cadaynin, waxaa kale oo halkan lagu qoray farqada 2aad oo u dhign  sidan ***waxay ku bixin kartaa ma ku qaban kartaa lacagaha ay bixinayso ama dirayso shilin Somaliland***, markaa halkaa waxaa ka muuqata in lacagaha kale ee caalamka ka jira ay isticmaali karaan xawaaladuhu, iyada oo gudidu soo ***jeedisay waxay ku bixin kartaa ama ku qaban kartaa lacagaha ay bixinayso ama dirayso shilin Somaliland iyada oo raacayo siyaasada isku beddelka lacagaha qalaad ee baanka***, halkaa markaa waxay ka soo qaadeen sarifkii in shilinka Somaliland ku qaban karo, loona badelayo loona raacayo siyaasadii sarifka qiimihii uu ka marayay ama jaangayntii uu bangigu sameeyay.

Anigu waxaan odhan lahaa si ka duwan ha loo dhigo sidii guddida iyo sidii uu markii hore xeerkuba u yaalay waxaanan u dhigi lahaa si ka duwan oo ah, wadan keena waxaynu ku isticmaalaa shilinka Somaliland oo lacag ayaynu leenahay waanad ogtihiin in lala tacaalayo sidii shilinka somaliland kor loogu qaadi lahaa, hadana inagu aynu xeerar ku soo saarno in lacago qalaad laga isticmaalo wadanka oo xawaaladaha iyo dadkuba is ticmaalaan inaga ayaa samaynayna sixir bararka iyo in uu shilinka Somaliland qiimo beelo intaba.

Waxaan markaa odhan lahaa ***in la joojiyo dhamaanba in xawaaladuhu ay bixiyaan lacago qalaad oo qofka lacag kale haloo soo diree in lagu siiyo Somaliland shiling.*** Marka loo baahdo lacago qalaadna in la geeyay bangiga si loogu sarifo *iyada* oo ay taasi keenayso baahi loo qabo shilinka Somaliland isticmaalkiisu uu kordho isticmaalkiisuna uu adkaado oo aanu qiimo beelin, laakiin marka aynu jidayno in lacagaha qalaad iyo shilinka Somaliland is dhex socdaan inaga ayaa qiimo tirayna Lacagteenii.

Markaa dadku waxay isticmaalayaan waa doollar oo lacagteenii waxay noqonaysaa mid faaliso ah oo waraaqeheedu meesha iska yaalaan oo aanqiimo lahayn wax allaale waxay qabanaysaana jirin in baaqiga uun layskugu celiyo maqaaxiyaha shaaha lagaga cabo iyo basaska lagu raaco oo aan wax kale lagu qabanayay isku bedelaysaa siday iminkaba tahay shilingka Somaliland.

**Soojeedin,** Waxaan markaa soo jeedin lahaa in lagu adkeeyo oo lagu adkeeyo oo la yidhaahdo xawaaladuhu waxay qabanayaan lacagta ay xawilayaan ee wadanka laga

dirayo shiling somaliland maaha in iyagana dadka lagu qasbo inay dollarka keenaan markay xawaalada lacagta dhigayaan waa in sida ay shiling somalilandta lagu khasbaa inay ka qabtaan shiling somaliland oo iyagu dollar u bedelaan oo bangkiga ka soo bedeshaan marka ay bixinayaana lacagta loo soo diro ee doollarka ahna qofka muwaadinka ah ee dalka gudihiisa ku qaadanayaa isagana lagu xukumo inuu qaato shilinka Somaliland, waxaan ka loo aan ka saari lahaa halka ay ku qoran tahay qabankartaa lacagta somaliland iyo lacagaha kale ee lays barbar dhigayo waxaan kaloo ku adkaynayaa dhamaan xeerarka kale ee jidaynaya in shiling somaliland iyo dollarba dalka laga wada isticmaalo uu ansaxo qodobkaasi oo waxka bedel lagu sameeyo.

**Qodobka 6aad** shuruudaha Ruqsada **F/1aad** oo u dhignaa *Foomka Codsiga Ruqsadda oo baanku wareegto ku soo saarayo*, waxay guddidu soo jeedinaysaa in sidan laga dhigo ayay yidhaahdeen *Warqada codsiga ruqsada oo baanku wareegto ku soo saaro*

**Farqada 7aad** oo u dhigan sidan iyada oo marwalba loo eegayo heerarka sarifka shilinka Somaliland.

A. ***Ajuurada Codsiga furida xawaalada wadaniga ahi waa 8,000,000 (sideed milyan) SL Shling oo aan la celinayn (Non-Refundable)***

Halkaa waxaan odhan xawaaladuhu isku wada mid maahee waa in loo sameeyaa ruqsado oo la yidhaa xawaaladani ma xawaalada dalka gudihiisa oo kali ah baa mise waa mid dibadana ka jirta, waana in ay yeelataa darajooyin, lacagaha lagu furanayaan,a waa in ay kala duwanaataa oo ta-wadanka gudihiisa isga iskaga xawisha waa in sideedaa milyan laga dhigaa, kuwa dibadana waa in la dhigaa 20 milyan oo kale ama 30 milyan ayaan odhan lahaa.

Sidoo kale halkaa ay ka dhigeen 15-ka milyan waa in laga dhigaa wax adag oo aanay cidwalba aanay iska furan oo qofkii shilin helaaba uu meel furto ama 10-kii qofba meel furtaan, kuwii hore u jirayna way kacayaan, markaa waa in laga dhigaa 50 Milyan.

**Cutubka 4aad Qodobka 20aad** iyo **Qodobka 21aad** Gudidu waxbay ka taataabatay, waxaanay khafiifiyeen awoodii uu bangigu kulahaa xawaaladaha hadii ay noqon lahay kormeerkooda iyo hantida umada u hayaan anigu labadaa qodob kuma raacsani Guddida **waxaanan soo jeedinayaa in sidii bangiga loo daayo,** waayo hadii meesha laga saaro ma wanaagsana oo waxay noqonayaan xawaaladuhu kuwo xadhkaha goosta oo aan waxba laga qaban karin waad mahadsantihiin WSC.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________________ | ______________________________ |